

Baaritaanka Caafimaadka Dumarka

Waa maxay baaritaanka caafimaadka?

Baaritaanka caafimaadka waxa ay dhakhaatiirtu u adeegsadaan in ay ku ogaadaan haddii uu cudur jiro. Baaritaanka waxa uu caawiyaa in xilli hore la ogaado dhibaato jirta, marka ay fududahay in la daweyn karo. Halkan waxaa ku xusan baaritaanka caafimaadka ee muhimka ah ee dumarka.

Balanta Baaritaanka Sanadlaha Ah

Da'a kasta

Soo booqo dhakhtarkaaga sanad kasta si aad ugala hadasho arrimaha caafimaadka oo aad u marto baaritaanka aad u baahan tahay.

Baaritaanka Ilkaha

Da'a kasta

Balanta dhakhtarka qabso 6dii bilood ee kasta si aad salka ilkaha caafimaadkooda u ilaaliso.

Baaritaanka Chlamydia

Da' kasta, haddii qofku ka qeyb qaato galmoodka

Chlamydia waa fashfash dabiici ah oo ah cudurada galmoodka lagu kala qaado (STI). Weydii dhakhtarkaaga baaritaanka Chlamydia iyo cudurada kale ee galmoodka lagu kala qaado (STI). Haddii aan la daaweyn, cudurada faafa ee galmoodka lagu kala qaado waxa ay keenaan dhibaato caafimaad.

Baaritaanka Kansarka ee Afka Ilmo Galeenka (Pap Test)

Da'da 21-64

Kala hadal dhakhtarkaaga in laga qaado muunadda 1 ilaa 3 sano.

Ma dooneysaa in lagaaga jawaabo su'aalaha caafimaadka? La hadal kalkaaliye caafimaad 24/7. Wac **(888) 275-8750, TTY: 711**

Su'aalaha ku saabsan Molina Healthcare, wac **1 (888) 999-2404, TTY: 711**

[MolinaHealthcare.com/WI](https://www.MolinaHealthcare.com/WI)

Baaritaanka Kansaraka ee Malawadka

Da'da 45-75

(Ama ka hor haddii horay looga helay qofka qoyska ka tirsan kansarka malawadka ku dhaca). Kala hadal dhakhtarkaaga noocyada kala duwan ee baaritaanada. Baaritaanka ugu badan waa in diirad lagu eego gudaha mindhicirada.

Baaritaanka Kansarka Naasaha (Mammography)

Da'da 50-74

Kala hadal dhakhtarkaaga sidii aad u mari laheyd sanad kasta raajada baaritaanka naasaha.

Baaritaanka Xajmiga Lafaha

Da'da 67-85

Dhakhtarkaaga weydii baaritaanka xajmiga lafaha si lagaaga baaro cudurka lafaha jilciya. Cudurka (Osteoporosis) waa mid lafaha ka dhiga kuwo jilicsan oo u nugul jabitaanka.



Baaritaanka Caafimaadka Ragga

Waa maxay baaritaanka caafimaadka?

Baaritaanka caafimaadka waxa ay dhakhaatiirtu u adeegsadaan in ay ku ogaadaan haddii uu cudur jiro. Baaritaanka waxa uu caawiyaa in xilli hore la ogaado dhibaato jirta, marka ay fududahay in la daaweyn karo. Halkan waxaa ku xusan qaar ka mid ah waxyaabaha muhimka u ah baaritaanka caafimaadka ragga.

Balanta Baaritaanka Sanadlaha Ah

Da'a kasta

Soo booqo dhakhtarkaaga sanad kasta si aad ugala hadasho arrimaha caafimaadka oo aad u marto baaritaanka aad u baahan tahay.

Baaritaanka Ilkaha

Da'a kasta

Waa in aad tagtaa dhakhtarka baaritaanka ilkaha 6dii biloowba hal mar si aad u ilaaliso ilkaha iyo ciridka.

Baaritaanka Chlamydia

Da'a kasta, haddii qofku ka qeyb qaato galmoodka

Chlamydia waa fashfash dabiici ah oo ah cudurada galmoodka lagu kala qaado (STI). Weydii dhakhtarkaaga baaritaanka Chlamydia iyo cudurada kale ee galmoodka lagu kala qaado (STI). Haddii aan la daaweyn, cudurada galmoodka lagu kala qaado waxa ay dhibaato caafimaad u keeni karaan adiga iyo qofka kula nool. Dhakhtarkaaga ayaa idinkula talin kara baaritaanka aad u baahan tihiiin si uu u ilaaliyo caafimaadkiina.

Ma dooneysaa in lagaaga jawaabo su'aalaha caafimaadka? La hadal kalkaaliye caafimaad 24/7. Wac **(888) 275-8750, TTY: 711**

Su'aalaha ku saabsan Molina Healthcare, wac **1 (888) 999-2404, TTY: 711**

Baaritaarka Kansaraka ee Malawadka

Da'da 50-75

(Ama ka hor haddii horay looga helay qofka qoyska ka tirsan kansarka malawadka ku dhaca). Kala hadal dhakhtarkaaga noocyada kala duwan ee baaritaanada.

Baaritaanka ugu badan waa in diirad lagu eego gudaha mindhicirada.

Baaritaanka Xajmiga Lafaha

Da'da 67-85

Dhakhtarkaaga weydii baaritaanka xajmiga lafaha si lagaaga baaro cudurka lafaha jilciya. Cudurka (Osteoporosis) waa mid lafaha ka dhiga kuwo jilicsan oo u nugul jabitaanka. Ma aha cudur "caafimaadka dumarka" u gaar ah. Raggana wuu ku dhacaa.

